



Ulajeedayadu waxa weeye in la hormariyo beesha Seattle iyadoo la abuurayo lana joogtaynayo deegaan nololeed oo fiican, amaan leh lana goyn karo oo ah mid abuuraya xasilooni kordhinayana isku-filaanshaha dadka leh dakhli ama dhaqaale hoose.

Codsiga hormariska ah ee gargaarka guriga

Distributed by PorchLight, a division of the Seattle Housing Authority



PorchLight



Qoraaladayada waxa la heli karaa iyagoo ah qaabab kala duwan.

Waxa aanu ku ballanqaadnay in aanu qoraaladayada, adeegyadayada iyo alaabayada ka dhigno kuwo ay heli karaan dadka leh naafo. Haddii aad qabtid naafo ama awood-dari una baahan tahay in gargaar lagaa siiyo buuxinta codsiga ama kiraysashada guri, fadlan codso gargaar. Tusaale ahaan, waxa aanu bixin karnaa waraaqaha codsiga oo ku qoran far waaweyn ama qaabab kale. Haddii aanaanu codsigaada gaarka ah waxba ka qaban karin, waxa aanu isku dayi doonaa in la helo siyaabo kale oo haqabtiri kara baahidaada.

Tilmaan-bixiyaha Codsiga



Ulajeedada 'Seattle Housing Authority' (Maamulka Guryaha Seattle) waxa weeye in la hormariyo beesha Seattle iyadoo la abuurayo lana joogtaynayo deegaan nololeed oo fiican, aamaan leh lana goyn karo oo ah mid abuuraya xasilooni kordhinayana isku-ilaanshaha dadka leh dakhli ama dhaqaale hoose.

Sida Aad Noola Soo Xidhiidhi Kartid .. 1
 Barnaamijyada Guryaha 2
 Sida Loo Codsado 3
 U-banaanaanta Gargaarka 4-5
 Goobaha Guryaha 6-7
 Su'aalaha Inta Badan la Isweydiyo ... 8
 Adeegyada Kale ee Guryaha 9

Wax kasta oo aad u baahan tahay inaad ogaatid si aad u buuxisid codsigaada hormariska ah.

Do you need an interpreter or translator?

The pre-application for housing assistance must be completed in English. Please tell us if you need an interpreter or translator to help you complete the pre-application or any other part of the application process. There may be an SHA employee who speaks your language who can help you. You can also contact one of the agencies below. If you are having trouble finding an interpreter or translator, call the American Red Cross at 206-323-6565, then dial 13251. Say your language, name and telephone number. Someone who speaks your language will call you back.

需要一位口譯員或筆譯員？

房屋補助的預申請必須用英文填寫。請注意，如果您不會說英文，我們提供用不同語言進行的申請輔導班。您同時可以與以下其中一個機構聯係以取得其他語言的幫助。如果您有困難找到一位口譯員或筆譯員，請給美國紅十字會打電話，他們的電話號碼是 206-323-6565，轉分機 13251。請說出您的母語，您的姓名和電話號碼，就會有說您語言的人給您回電話。

Вам необходим переводчик?

Предварительное заявление для получения помощи по оплате жилья должно быть заполнено по-английски. Если вы не говорите по-английски, пожалуйста, примите к сведению, что мы проводим семинары по заполнению заявления на нескольких других языках. Вы можете также обратиться в одно из указанных ниже учреждений, если вам нужна помощь переводчика по другим вопросам. Если вам трудно найти переводчика, позвоните в Американский Красный Крест по телефону 206-323-6565, затем наберите 13251. Назовите свой язык, имя и номер телефона. Вам позвонит человек, который говорит на вашем языке.

Quý vị có cần thông dịch viên hay phiên dịch viên không?

Đơn xin sơ khởi về trợ cấp gia cư phải được điền bằng tiếng Anh. Nếu quý vị không nói được tiếng Anh, xin lưu ý rằng chúng tôi có hướng dẫn những buổi hội thảo về đơn xin trong nhiều ngôn ngữ khác nhau. Quý vị cũng có thể liên lạc với một trong những cơ quan dưới đây để xin những giúp đỡ khác về vấn đề ngôn ngữ. Nếu quý vị gặp trở ngại tìm kiếm một thông dịch hay phiên dịch viên, xin gọi Hội Hồng Thập Tự Hoa Kỳ (American Red Cross) số 206-323-6565, sau đó bấm 13251. Nói ngôn ngữ, tên và số điện thoại của quý vị. Sẽ có người nói cùng ngôn ngữ với quý vị gọi lại quý vị.

¿Necesita usted un intérprete o traductor?

La solicitud preliminar de asistencia para vivienda debe ser completada en inglés. Si no habla inglés, por favor tome nota que tenemos talleres para llenar solicitudes en varios otros idiomas. Usted puede también ponerse en contacto con una de la agencias a continuación para ayuda con otro idioma. Si está teniendo problemas para encontrar un intérprete o traductor, llame a la Cruz Roja al 206-323-6565 y luego marque la extensión 13251. Indique su idioma, su nombre y número de teléfono. Alguien que habla su idioma le devolverá la llamada.

Ma u baahan tahay qof turjimaan ah?

Waraqada Arjiga ee caawinaada guryaha waa in lagu soo buuxiyaa Ingriis. Haddii aadan ingriiska ku hadlin, fadlan ogow warbixinta arjiga waxaanu ku bixinaa dhowr luqadood. Waxaad kaloo la xariiri kartaa shirkadaha hoos ku qoran wixii caawinaad luqada. Haddii aad ku qabto wax dhibaato ah helitaanka turjibaan, soo wac American Red Cross telefoonka ah 206-323-6565, ka dibna 13251. Dheh luqadaada hooyo, magacaada iyo telefoon lambarkaada. Qof luqadaada ku hadla ayaa dib ku soo wici doona.

TURJUBAANO IYO TARJUMEAAL

Asian Counseling and Referral Services	206-695-7566	Horn of Africa Services	206-760-0550
Chinese Information and Service Center	206-624-4062	Jewish Family Services	206-461-3240
Community Services for the Deaf	206-322-5551	Korean Community Counseling Services	206-784-5691
Deaf/Blind Services	206-323-9178	Somali Community Services	206-760-1181
El Centro de la Raza Resource Center	206-329-2974	Soviet Union Refugee Association	425-481-8859
Ethiopian Community Mutual Association	206-325-0304	Ukrainian Services	253-854-8229
Filipino translation	206-461-4870	United Khmer Community (Cambodian)	206-766-9677

'PorchLight Housing Center' (Xarunta guryaha PorchLight) ee 'Seattle Housing Authority' (Maamulka Guryaha Seattle)

'PorchLight Housing Center' waa qayb ka tirsan 'Seattle Housing Authority,' oo Seattle dhexdeeda ka ah hay'adda ugu weyn ee bixisa guryo la iska bixin karo.

PorchLight waxay aqbashaa codsiyada barnaamijyada guryaha ee SHA, waana xarunta 'Housing Choice Voucher Program' (Section 8) (Barnaamijka Foojarka Doorashada Guryaha) ee SHA.

Adrees


907 N.W. Ballard Way, Suite 200
Seattle, WA 98107-4637

Saacadaha Xafiiska

Talaado ilaa Jimce, 9:30 subaxnimo to 4:30 galabnimo

Adeegga Macmiilka

Teleefonka Koobaad 206-239-1500
Maqal-laawaha (TDD) 1-800-833-6384
Faakis 206-239-1770
Xidhiidhka Warbaahinta 206-239-1668
Rugta Internetka www.sea-pha.org



Sida Baska Loogu Tago PorchLight

PorchLight waxa lagu tagi karaa baska Metro Lam. 28. Basaku waxay 30-kii daqiiqadoodba ka baxaan badhtamaha Seattle. Kaga dag baska 'Eighth Avenue Northwest' iyo 'Leary Way,' galbeed u raac 'Northwest Ballard Way' masafo ah hal saf-guri. Waxa kale oo la sameyn karaa in laga bedesho 'Northwest Market Street' oo loo bedesho basaska lam. 28 oo maraya 'Eighth Avenue Northwest.' 'PorchLight Housing Center' waxa uu fogaan ah sagaal saf-guri koonfur ka xigaa barta 'Northwest Market Street' ka gooyo 'Ninth Avenue Northwest.'

Ka soo wac 'King County Metro' teleefonka 206-553-3000 si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan jidadka basaska. Haddii aad tahay naafo una baahan tahay adeeg bas oo aad raaci kartid, soo wac 206-263-3113.

Sida Baabuur Loogu Tago PorchLight

Marka aad ka imanaysid 'Interstate 5'

- Ka bax 'exit 169' una soco galbeed jidka 'North 45th Street.'
- Ku sii soco galbeed qiyaas ah saddex mayl adigoo u jeeda xagga Ballard. Jidka 'North 45th Street' waxa uu isu bedelaa 'Northwest Market Street.'
- Marka aad joogtid jidka 'Eighth Avenue Northwest,' bidix u leeco oo gal jidka 'Northwest 47th Street,' ka dibna u leexo midig.
- PorchLight wax yar ayay kaa horeysaa xagga bidixda, ka soo horjeedka 7-Eleven iyo 'Jack in the Box.'

Marka aad ka imanaysid badhtamaha Seattle

- Xagga waqooyi u raac 'Elliott Avenue' adiga oo dhinac biyaha maraya. (Ogow in magacyada jidadku in badan is bedelaan.)
- Ka gudub birijka ama buundada 'Ballard Bridge' ka dibna ka bax meesha ugu horaysa ee laga baxo ee ku xigta birijka. Midig u gal 'Northwest Ballard Way.'
- Bari u soco ilaa saddex saf-guri. PorchLight waxay kaa qabanaysaa midig, ka soo horjeedka 7-Eleven iyo 'Jack in the Box.'

Marka aad ka imanaysid 'Aurora Avenue North' (Highway 99)

- Ka bax 'Zoo/Green Lake exit.'
- Bidix u gal 'North 46th Street' una raac xagga buurta ka dagaysa ilaa Ballard. Jidka 'North 46th' waxa uu isu bedelaa jidka 'Northwest Market Street.'
- Marka aad joogtid 'Eighth Avenue Northwest,' bidix u leexo siina sooco ilaa aad ka galaysid jidka 'Northwest 47th Street,' ka dibna midig u leexo siina soco ilaa laba saf-guri. PorchLight waxay kaa qabanaysaa bidix, ka soo horjeedka 7-Eleven iyo 'Jack in the Box.'

Marka aad ka imanaysid North Seattle

- Koonfur u raac jidka '15th Avenue Northwest.' Wax yar ka hor intaanad gaadhin birijka 'Ballard Bridge,' ka bax 'Leary Way exit' oo midigta kaa qabanaya.
- Bidix u gal 'Leary Way Northwest' (birijka hoostiisa) siina soco ilaa saddex saf-guri.
- Midig u gal jidka '11th Avenue Northwest' siina soco ilaa hal saf-guri.
- Bidix u gal jidka 'Northwest Ballard Way.' PorchLight waxay kaa qabanaysaa midigta, ka soo horjeedka 7-Eleven iyo 'Jack in the Box.'

Low Income Public Housing (LIPH) (Guryaha Dawladda ee Dadka Dakhliga Hoose)

Barnaamijka 'Low Income Public Housing program,' ama LIPH, waxa uu qoysaska iyo dadka dakhligoodu ama dhaqaalahoodu hooseeyo siiyaa guryo kiradoodu jaban tahay. Guryaha ah 'Low Income Public Housing' waxay ku yaallaan Seattle, waxana ay ku kala duwan yihiin tirada qolalka jifka. Marka la eego guryaha ah LIPH ee tiradoodu ka badan tahay 5,000 ee u maamulo SHA, qiyaastii 2,300 guri ayaa ah guryo waaweyn oo ku filan qoysaska, halka qiyaastii 3,000 oo guri loogu talagalay qofka kaligii ah iyo lamaanaha is qaba. Guud ahaan daganayaasha guryaha 'Low Income Public Housing' waxay boqolkii 30 mushaharkooda bil walba ku bixiyaan kirada iyo adeegyada guriga sida korontada. Guryaha intooda badan waa laga ogol yahay haysashada xayawaanka yaryar.

► **Doorashada meesha aad doonaysid inaad ku noolaatid:** Haddii codsadeyaasha guryaha 'Low Income Public Housing' ay doonayaan ama u baahan yihiin inay ku noolaadaan aag ama xaafad gaar ah, waxa ay dooran karaan inay sugaan in guri ka soo baxo ilaa laba goobood oo ay doorteen. Codsadeyaasha doonaya inay guri ah 'Low Income Public Housing' ka sugaan goob gaar ah waa inay isa soo qoraan 'Site Specific Waiting List' (Liiska Sugitaanka Goob Gaar ah). Fadlan ogsoonow in guriga laga sugayo goob gaar ah u keeni karo in mudo dheer guri la sugo. Codsadeyaasha ay haysto baahi guri oo degdeg ah waxay dooran karaan inay qaataan guri kasta oo ah 'Low Income Public Housing' oo looga soo helo meel magaalada ah haddii ay saxeexaan 'Next Available Unit Waiting List' (Liiska Sugitaanka Guriga Ugu Horeeya ee Soo Baxa). Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan doorashada liiska sugitaanka guri ah 'Low Income Public Housing,' ka eeg qaybta "Su'aalaha Inta Badan la Isweydiyo" oo ku taalla bogga 8 iyo fariimaha codsiga hormariska ah.

Guryaha Dakhliga Isku-jirka ah



NewHolly, oo ah beel dadkeedu leeyihiin dakhli kala duwan, waxay leedahay guryo ah 'Low Income Public Housing,' waxana ay aqbalaan codsiyada marka guri ka soo banaanaanayo. Waxa aad isticmaali kartaa warqadda codsiga ee 'Seattle Housing Authority' ee la yidhaahdo 'Pre-application for housing assistance' (codsiga hormariska ah ee gargaarka guryaha) si aad u codsatid guryaha NewHolly ee noocoodu yahay guryo ah 'Low Income Public Housing.' NewHolly waxay kaloo leedahay guryo noocyo kala ah, sida guryo kiradoodu sicirka suuqa la socoto iyo guryo la goyn karo oo cashuur ka-dhimis leh, kuwaasoo leh shuruudo u-banaanaan iyo hab codsasho oo gaar ah. Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan codsiga guryaha, ka eeg qaybta "Su'aalaha Inta Badan la Isweydiyo" ee ku taalla bogga 8.



Seattle Senior Housing Program (SSHP) (Barnaamijka Guryaha Waayeelka ee Seattle)

Seattle Senior Housing Program, ama SSHP, waxa lagu aasaasay xeer damaanad ah oo ay codbixin ku aqbaleen codbixiyayaasha Seattle 1981. Iyadoo la marayo SSHP, ayaa 'Seattle Housing Authority' waxay maamushaa qiyaastii 1,000 guri oo ah guryo la goyn karo oo loogu talagalay waayeelka iyo dadka waaweyn ee naafada ah ee dakhliga soo galaa u dhigmo boqolkii 80 dakhliga celceliska ah ama u kaba yar yahay. (Ka eeg qaybta "U-banaanaanta Gargaarka" ee ku taalla bogga 4 wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan qofka loo ogol yahay SSHP.) Barnaamijka SSHP waxa uu barnaamijka guryaha ee caadiga ah kaga duwan yahay waxa weeye dawladda federalka kama helo lacag uu ku shaqeeyo. Sidaa daraadeed, lacagta kirada ah ee laga qaadayo daganayaasha waa in laga dhigaa heer u ogalaanaya 'Seattle Housing Authority' inuu bixiyo dhamaan kharashka hawsha barnaamijka. SSHP waxay bixisaa guryo ku haboon dadka cimrigoodu yahay 62 sannadood ama ka weyn iyo dadka waaweyn ee leh naafo ee cimrigoodu yahay 18 ama ka weyn. Guryaha SSHP waa guryo qurux badan oo si ka-fiirsasho leh loo dhisay, kuna yaalla xaafadaha la jecel yahay sida Green Lake, West Seattle, Queen Anne iyo Magnolia.

► **Kirada SSHP:** Daganayaashu waxay boqolkiiba 30 dakhligooda ku bixiyaan kirada ama waxay bixiyaan lacag ah ugu yaraan \$210. Laga bilaabo 1 Bisha Tobnaad, 2003, xeer cusub ayaa hirgali doonaa kaasoo lacagta ugu yar ee la bixinayo ka dhigi doona \$220 isla markaana sameyn doona saddex heer kiro oon dhimis lahayn oo kala ah: \$350, \$500 and \$650. Daganayaasha cusub waxa laga qaadi doonaa kiro u dhiganta mid ka mid ah heerarka kirada iyadoo la eegayo dakhligooda. Wixii war dheeraad ah ka wac 206-615-3351.



Guryaha 'Impact Property Management' (IPM) (Maamulista Guryaha Saameynta)

Guryaha 'Impact Property Management' (IPM) waxa iska leh oo maamula SHA. Kiradoodu badanaa waa boqolkiiba 30 dakhliga bisha. Guryahani intooda badan way ogol yihiin xayawaanka yaryar. Guryahani waxay leeyihiin qaabab iyo cabbiro kala duwan, sida guryo ah 'townhouse,' guryo ah beel iyo daqabyo dhaadheer. Bogga 7 ka eeg maabka iyo goobaha IPM.

► **Xadka dakhliga ee IPM:** Guryaha 'Impact Property Management' way ku kala duwan yihiin xadka dakhliga. Waxa uu noqon karaa boqolkiiba 30, boqolkiiba 50 ama boqolkiiba 80 marka la eego dakhliga celceliska ah ee aagga ama xaafadda. Waxa kaloo jirta in guryaha qaarkood leeyihiin heer dakhli oo la jecel yahay oo ka hooseeya xadka ugu sareeya. Fadlan bogga 7 ka eeg tusaha goobaha IPM si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan guryo gaar ah.

Housing Choice Voucher Program (Section 8) (Barnaamijka Foojarka Doorashada Guryaha)

Waanu ka xunahay, laakiin laga bilaabo 1-da Bisha Todobaad, 2003, waxa aanu si ku-meel-gaadhsiis ah u joojin doonaa qabashada codsiyada cusub ee lagu codsanayo barnaamijka 'Housing Choice Voucher Program' (Section 8). Annaga ayaa dadweynaha soo ogeysiin doona goorta aanu qaban doono codsiyada cusub. Waxay u badan tahay in aanaanu aqbalin codsiyada cusub ee guryaha 'Section 8' mudo ah ugu yaraan sannad.

1. Dhiib codsiga hormariska ah

Buuxi 'Pre-application for housing assistance' (codsiga hormariska ah ee gargaarka guryaha) ka dibna u soo celi PorchLight oo gacanta ka keen ama boosta ku soo dir. Ma aqbali karno codsi faakis lagu soo diro. Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan sida boosta loogu soo diro codsigaaga hormariska ah, ka eeg qaybta "Su'aalaha Inta Badan la Isweydiyo" ee ku taalla bogga 8.

► **Tabobarka Ikhtiyaarka ah ee Codsiga:** Tabobarka ikhtiyaarka ah ee ay bixiso PorchLight waxa uu socdaa mudo ah hal saac, waxana ku jira bandhig ku saabsan barnaamijyada guryaha ee SHA, habka codsiga iyo shuruudaha u-banaanaanta. Marka tabobarku dhamaado, shaqaale ka tirsan SHA ayaa codsigaaga hormariska ah ka eegi doona in wax ka maqan yihiin kana jawaabi doona su'aalo wixii aad qabtid. Tabobarada waxa la qabtaa xilliyo kala duwan iyadoo la eegayo hadba sidii loogu baahdo. Ma bixino tabobar maalmaha Sabtida iyo Axadda ama maalmaha ciidaha. Fadlan soo wac 206-239-1500 ama booqo rugtayada Internetka si aad u ogaatid maalmaha iyo wakhtiga tabobarka. Ku soo talogal inaad PorchLight joogtid ugu yaraan 15 daqiiqadood ka hor intaan tabobarku bilaabmin. Codsadeyaasha soo raaga looma ogalaan doono inay galaan tabobarka.

► **Haddii aanad Ingiriisiga ku hadlin:** Warqadda 'Pre-application for housing assistance' waa in Ingiriis lagu buuxiyo. Haddii aad u baahan tahay in afka lagaa gargaaro si aad u buuxisid qayb ka tirsan habka codsiga, fadlan noo sheeg ama la xidhiidh mid ka mid ah hay'adaha ku taxan tusaha bogga tusmada. Waa loo ogol yahay turjubaanada iyo tarjumayaashu inay u soo raacaan codsadeyaasha wareysiyada iyo kulannada.

► **Noo sheeg haddii aad bedeshid adreeskaaga:** Waa inaad nala soo socodsiiid haddii adreeskaagu is bedelo. Haddii aanad ka soo jawaabin waraaqaha aanu soo dirno, waxa dhici karta in magacaaga laga tirtiro dhamaan liisaska sugitaanka waxana qasab kugu noqon doonta inaad habka codsiga dib u soo bilaabtid.

2. Gal liiska sugitaanka

► **Heerka Kala-horeynta:** Codsadeyaasha ku jira liisaska sugitaanka ee barnaamijyada guryaha ee 'Seattle Housing Authority' waxa la siiyaa heer kala-horeyn. Heerka kala-horeynta ee lagu siiyay waxa kaliya ee uu saameynayaa kala-horeynta halka codsigaagu ka galayo – ma saameynayo in gargaar lagu siin doono iyo inaan lagu siin doonin.

Kala-horeynta 'Low Income Public Housing': Codsade kasta oo ka soo baxaya sharaxaadda soo socota ee ku saabsan "dakhli aad u hooseeya" iyo "hoy la'aan" waxa la siiyaa horeynta koobaad. Dadka kale oo dhami waxay galaan safka labaad.

1. *Sharaxaadda Dakhli aad u hooseeya: Waa qoys (1) u soo galo dakhli u dhigma boqolkiiba 30 dakhliga celceliska ah ee aagga ama wax ka yar (2) u soo galay dakhli u dhigma boqolkiiba 30 dakhliga celceliska ah ee aagga ama wax yar mudo ah 12-kii bilood ee ka horeeyay go'aaminta u-banaanaanta. Eeg tusaha ku yaalla midigta.*

2. *Sharaxaadda hoy la'aanta: Waa qoys (1) ku nool jidka, gabood (shelter), ama guri ku-meel-gaadhisiis ah (2) macmiil u ah barnaamij maamulid arrimo bulsho oo u adeega dadka aan hoy haysan ama (3) ka soo baxay mid ka mid ah shuruudahan mudo ah 12-kii bilood ee ka horeeyay go'aaminta u-banaanaanta.*

Kala-horeynta 'Seattle Senior Housing Program': Codsadeyaasha SSHP ee ku nool Seattle waxa la siiyaa horeynta koobaad. Codsadeyaasha ku nool dibadda Seattle waxa la siinaya horeynta labaad.

XADKA DAKHLI AAD U HOOSEEYA		
Tirada Dadka ama Qoyska	30% dakhliga celceliska ah (sannadkii)	30% dakhliga celceliska ah (bishii)
1	\$16,350	\$1,350
2	\$18,700	\$1,550
3	\$21,050	\$1,750
4	\$23,350	\$1,950
5	\$25,250	\$2,100
6	\$27,100	\$2,250
7	\$29,000	\$2,400
8	\$30,850	\$2,550

Xadka dakhliga 2002/2003 ee HUD; wuu bedelmi karaa.

3. Maalinta wareysigaaga keen codsi buuxa

Marka magacaaga liiska ku qoran la gaadho, boosta ayaa lagugula soo xidhiidhi doona waxana lagu sheegi doona taariikhda wareysigaaga. Inta wareysiga lagu jiro, qof shaqaalaha ka tirsan ayaa kula hagaajin doona habka codsiga dhamaantii. Isla wakhtigaa ayaa lagaa qaadi doona wixii dukumenti ama waraaqo ah si go'aan looga gaadho in gargaar kuu banaan yahay iyo in aanu kuu banaanayn.

4. Ogalaanshaha ama diidmada codsigaaga

Haddii codsigaaga iyo dukumentigaagu tilmaamayaan in gargaarku kuu banaan yahay, waxa lagu siin doona ogalaansho gargaar oo shuruud leh waxana kuu bilaabmi doona sugitaanka guri. Ogalaanshuhu wuxu leeyahay shuruud ilaa aad ka kireysanaysid guri. Haddii codsigaagu u tilmaamayo inaan gargaarku kuu baanaanayn, waxa lagu siin doona diidmo shuruud leh. Marka tani dhacdo, waxa lagu siin doona fursad aad ku keentid war dheeraad ah oo tilmaamaya in gargaar kuu banaan yahay. Haddii mar kale codsigaaga la diido, waxa aad leedahay hal fursad oo ah kama-dambeyn oo aad kaga doodid diidmada adiga oo codsanaya dhageysi garsoor ah.

Xadka Dakhliga

Barnaamijka guri kastaa waxa uu leeyahay xad dakhli oo u gaar ah. Marka laga hadlayo 'Low Income Public Housing' iyo 'Seattle Senior Housing Program,' dakhligaagu ma dhaafi karo boqolkiiba 80 dakhliga celceliska ah ee aagga. (Si aad u codsatid guryaha 'Low Income Public Housing' ee NewHolly, waa inaan dakhligaagu dhaafin boqolkiiba 30 dakhliga celceliska ah ee aagga.) Xadka dakhliga ee guryaha 'Impact Property Management' wuxu noqon karaa 30, 50 ama 80 boqolkiiba dakhliga celceliska ah ee aagga. Eeg tusaha midigta ku yaalla.

Aqoonsiga qoys ahaan

Codsadeyaasha waa in loo aqoonsado "qoys." Wixii war ah ee ku saabsan aqoonsiga qoys marka laga hadlayo barnaamijyada guryaha ee gaarka ah, ka eeg hoos iyo bogga 5.

Xaaladda Imigirayshanka

Looma baahna inaad haysatid dhalashada Maraykanka si aad guri u codsatid, laakiin waxa loo baahan yahay inaad haysatid dhalashada Maraykanka ama sharci imigirayshan oo barnaamijku u banaan yahay si guri lagu siiyo. U-banaanaantaada waxa la hubin doonaa sannad ka dib marka aad guri kireysatid. Waxa kaa lumi kara dhamaan ama qayb ka tirsan gargaarka lagu siiyo haddii aanad haysan dhalasho ama sharci imigirayshan oo la aqbali karo wakhtigaa. Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan sharciga imigirayshanka iyo gargaarka guryaha, ka eeg qoraalka yar ee la yidhaahdo '*How your immigration status can affect your housing assistance*' (Sida Sharciga imigirayshanku u saameyn karo gargaarkaaga guryaha) oo laga heli karo 'PorchLight Housing Center.' Boosta ayaa laguugu soo diri karaa qoraalka yar haddii aad soo wacdid 206-239-1500. Qoraalka yar waxa lagu heli karaa dhawr af.

XADKA DAKHLIGA SANNADKII EE BARNAAMIJYADA GURYAHA			
Tirada Dadka ama Qoyska	Low Income Public Housing 80% dakhliga celceliska ah	Seattle Senior Housing Program 80% dakhliga celceliska ah	Guryaha 'Impact Property Management'
1	\$39,550	\$39,550	Guryuhu way ku kala duwan yihiin xadka dakhliga ee loo ogol yahay barnaamijka.
2	\$45,200	\$45,200	
3	\$50,850	\$50,850	
4	\$56,500	\$56,500	
5	\$61,000	NA	
6	\$65,550	NA	
7	\$70,050	NA	
8	\$74,600	NA	
9	Qof kasta oo dhaafsan 8, ku dar 8% xadka dadka 4 ah oo u gee xadka dadka 8 ah kuna soo koob \$50.	NA	
10		NA	

Xadka dakhliga 2002/2003 ee HUD; wuu bedelmi karaa.

Soo sheegista maalkaaga

Dhamaan barnaamijyada guryaha ee SHA waxay xisaabta ku daraan maalkaaga marka la xisaabinayo dakhligaaga. Qiimaha dhabta ah ee maalkaaga laguma daro xisaabinta dakhliga, laakiin waxa lagu daraa dakhliga kaa soo gala maalka. Tusaale ahaan, haddii aad lacag ku haysatid xisaab dhigaal ah (savings account), lacagtaa laguma dari doono dakhligaaga. Hase yeeshee, dulsarka kaa soo gala lacagta kuugu jirta bangiga waxa lagu dari doonaa dakhligaaga sannadkii. Barnaamij guri oo kastaaba waxa uu leeyahay xeer u gaar ah oo ku saabsan dakhliga laga helo maalka.

Shuruudaha kale: Guryaha 'Low Income Public Housing'

► **Aqoonsiga qoys ahaan:** Marka laga hadlayo guryaha 'Low Income Public Housing,' SHA waxay "qoys" ku sharaxday hal qof ama koox dad ah oo wadaaga hoy, leh dakhli iyo meel wax ka soo galaan si loo haqabtiro baahida qoyska, isla markaana muujiyay xidhiidh qoys oo xasilay. Waxa tan ku jira lamaanaha is qaba ama aan is qabin, dadka is xiga ama kuwa aan is xigin iyo dadka kaligood ah.

► **Haboonaanta Guud:** SHA waxa waajib ka saaran yahay inay dhamaan daganeyaasheeda ay u sameyso deegaan xasiloon oo amaan ah. Sidaa daraadeed, waxa aanu shaandheynaa dhamaan codsiyada sida ay sameeyaan maamuleyaasha guryaha intooda badani. Si codsada looga soo qaado inuu yahay qof u qalma gargaarka guryaha, waa in codsadu muujiyo inuu iska bixin karo kirada wakhtiga lagu yeesho, uu daryeeli karo guriga si nabad ahna kula noolaan karo dariska ama jaarka.

► **Taariikhda Dagananta Guri:** Tilmaanta ugu weyn ee sheegaysa in qofku awood u leeyahay inuu ka soo bixi karo waajibbaadka dagane-guri waxa weeye taariikh kiro oo dhow oo sumcad wacan wadata. SHA waxay si weyn isugu helayaa sumcadda qofku ku leeyahay mulkiilayaasha guryaha si go'aan looga gaadho in qofku u qalmo guryaha 'Low Income Public Housing' iyo barnaamijka 'Seattle Senior Housing Program.' Waxa kale oo aanu xisaabta ku darnaa noocyo kale oo ah taariikh daganan guri oo xasiloon, iyo waliba shaqo-haynta iyo waxyaabo kale marka go'aan laga gaadhayo u-qalmidda.

► **Taariikhda Dambiyada:** SHA waxay soo baadhaa dhamaan codsadeyaasha taariikhdooda dambi. Haddii taariikhda dambi ee codsadu ay tilmaamayso in qofku aanuu u qalmin in guri la siiyo, qofka codsigiisa waa la diidi karaa. Diidmadu waa mid toos ah haddii codsadu galay dambiyada qaarkood, sida kuwa ku taxan bogga 5. Liiskaasi ma sheegayo dambi kasta oo keeni doona diidmo gargaar, waxa kaloo diidmo keeni kara dambiyada aan liiska ku jirin. Fadlan la tasho shaqaale SHA haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan dambi hore oo saameyn kara codsigaaga. Mudooyinka u dhexeeya laba wakhti kuma jiraan wakhtiga xabsi ku-jirista.

Fadlan ka eeg bogga 5 wixii war dheeraad ah.

Ka timi bogga 4.

Dambiyada diidmada tooska ah leh

Diidmadu waa mid toos ah haddii codsaduho galay dambiyada qaarkood, sida kuwan hoos ku taxan. Fadlan la xidhiidh qof ka tirsan shaqaalaha SHA haddii aad su'aalo qabtid. Mudooyinka u dhexeeya laba wakhti kuma jiraan wakhtiga xabsi ku-jirista.

- Ka-eryid guri dawlad iyadoo sababtu tahay fal la xidhiidha daroogo sharci-daro ah oo dhacay 3 sannadood gudahood
- Daroogada sharci-darada ah oo imminka la isticmaalo
- Methamphetamine lagu sameeyo guryaha dawladda ama meel kale
- Dambiyo galmo oo keenaya diiwaangalin dambiile galmo
- Diiwaan tilmaamaya in qofku ku noqnoqday isticmaal-xumida aalkolada
- Haysasho daroogo ama isticmaal daroogo oo dhacay 2 sannadood gudahood
- Qaadista daroogo oo dhacday 5 sannadood gudahood
- Damac ah in la iibo daroogo oo dhacay 5 sannadood gudahood
- Farosaar galmo oo dhacay 10 sannadood gudahood
- Farosaar dambi adag oo dhacay 5 sannadood gudahood
- Dambi fudud oo dhacay 2 gudahood
- Afar dambi ama in ka badan oo ah farosaar oo dhacay 10 sannadood gudahood
- Dab-qabadiin dhacday 10 sannadood gudahood
- Dil bini'aadan oo dhacay 20 sannadood gudahood
- Guri-jabsi dhacay 2 sannadood gudahood
- Tuugo xoog ah oo dhacday 5 sannadood gudahood
- Tuugo xoog hubeysan oo dhacday 10 sannadood gudahood
- Afduub dhacay 7 sannadood gudahood
- Dhileysi dhacay 2 sannadood gudahood
- Budhcadnimo guriga dhexdiisa ah oo dhacay 5 sannadood gudahood
- Dambi kale oo culus oo dhacay 3 sannadood gudahood
- Dambiyada kasta oo tilmaamaya dabeecad dambi-galka caadeysatay

Shuruudaha kale: Seattle Senior Housing Program (SSHP) (Barnaamijka Guryaha Waayeeleka ee Seattle)

► **Aqoonsiga qoys ahaan:** Qoysaska barnaamijka 'Seattle Senior Housing Program' waxa lagu xadaday ama lagu soo koobay qoysaska halkiisa xubin, madax ama nin/afo uu yahay mid ka mid ah kuwan soo socda: (1) qof jira ugu yaraan 62 sannadood ama (2) qof leh naafo jidh, naafo maskax ama awood-dari. Lama ogola qof ka tirsan qoys ah SSHP inuu ka yaraado 18 sannadood. Fadlan la soco inaan SHA aanay codsadeyaasha cimrigoodu ka yar yahay 62 sannadood aanay u gudbinaynin gurhaya wakhtiga la heli karo.


► **Habka shaandheynta iyo kharashka:** Codsadeyaasha barnaamijka 'Seattle Senior Housing Program' waa inay ka soo baxaan isla shuruudaha haboonaanta guud, taariikhda daganaanta guri iyo taariikhda dambiyada ee laga rabo codsadeyaasha guryaha 'Low Income Public Housing.' Mida kale, fadlan la soco in dhamaan codsadeyaasha SSHP la marin doono baadhitaan taariikh guri-kireysi, baadhitaan dayn, baadhitaan lambar sugid (sooshiyal), iyo baadhitaan taariikh dambi mudada lagu jiro shaandheynta. Dhamaan codsadeyaasha waxa laga rabaa inay bixiyaan kharashka shaandheynta (imminka waa \$35).

► **Wixii war dheeraad ah:** Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan habka ogalaanshaha SSHP iyo SSHP, fadlan u waco 206-615-3351.

Soo eeg guryahayaga

Waxa aad eegi karta sawirada guryahayaga ee ku yaalla rugtayada internetka. Soo booqo kaliya www.sea-pha.org ka dibna guji barta "About Us" ka dibna guji "Building Photos." Waxa kale oo aad internetka ka heli kartaa qoraalo iyo adeegyo badan oo waxtar leh, sida waraaqaha la buuxinayo ee muhiimka ah, u-gudbin faa'iido leh iyo warka sida loola xidhiidho shaqaalaha PorchLight iyo shaqaale kale oo ka shaqeeya SHA.

Meesha la naga helo



Fadlan ka eeg bogga 7 wixii war dheeraad ah.

Ka timi bogga 6.

LIPH: Guryo loogu talagalay dadka waaweyn kaliya
 Dhamaan guryaha LIPH waxay ogol yihiin haysashada shimbiraha ama kaluunka ama hal ey ama hal bisad oo ah xayawaan guri. Xayawaanka guriga lagu haysto waxa qabanaya xad ah xagga weynaanta iyo xeerar kale.

DHISME	XAAAFAD	ADREES	GURYO	QOLJIIF.	
Cedarvale House	Northgate	11050 8th Ave NE	118	1,2	NORTHEAST
Green Lake Plaza	Green Lake	505 NE 70th St	130	1	
Jackson Park House	Lake City	14396 30th Ave NE	72	1	
Lake City House	Lake City	12546 33rd Ave NE	116	1	
University House	University District	4700 12th Ave NE	102	1	
University West	University District	4544 7th Ave NE	114	1	NW
Ballard House	Ballard	2445 NW 57th St	80	1	
Lictonwood	Greenwood	9009 Greenwood Ave N	81	1	SOUTHEAST
Tri-Court ¹	Bitter Lake	720 N 143rd St	86	1	
Barton Place	Rainier Beach	9201 Rainier Ave S	91	1	
Beacon Tower	Beacon Hill	1311 S Massachusetts	109	1	SOUTHEAST
Center Park ²	Rainier Valley	2121 26th Ave S	150	0,1,2	
Holly Court	Rainier Valley	3804 S Myrtle St	97	1,2	SW
Cal-Mor Circle	West Seattle	6420 California Ave SW	75	1	
Stewart Manor	West Seattle	6339 34th Ave SW	75	1	SW
Westwood Heights ³	West Seattle	9455 27th Ave SW	151	0,1	
Bell Tower	Downtown	2215 1st Ave	120	1	CENTRAL
Capitol Park	Capitol Hill	525 14th Ave E	126	1	
Center West	Queen Anne	533 3rd Ave W	92	1	
Denny Terrace	Capitol Hill	100 Melrose Ave E	222	0,1,2	
Harvard Court	Capitol Hill	610 Harvard Ave E	81	1	
International Terrace	International Dist	202 6th Ave S	100	1	
Jefferson Terrace	First Hill	800 Jefferson St	300	0,1,2	
Olive Ridge	Capitol Hill	1700 17th Ave	107	1,2	
Olympic West	Queen Anne	110 W Olympic Pl	76	0,1	
Queen Anne Heights	Queen Anne	1212 Queen Anne Ave N	53	1	
Ross Manor	Downtown	1420 Western Ave	100	1	
West Town View	Queen Anne	1407 2nd Ave W	59	1	

LIPH: Dhismeyaal leh guryo qoys

SHA waxa kale oo ay leedahay ama maamushaa guryo kale oo ah LIPH oo loogu talagalay qoysaska, oo la yidhaahdo "goobaha fiiqsan," kuwaasoo aan hoos ku taxnayn. Guryaha goobaha fiiqsan waxay ku yaallaan meelo ah Seattle.

DHISME	XAAAFAD	ADREES	GURYO	QOLJIIF.	
Cedarvale Village	Northgate	11050 8th Ave NE	24	2,3,4	NE
Jackson Park Village	Lake City	14396 30th Ave NE	41	3,4	
NewHolly ⁴	Rainier Valley	7050 32nd Ave S	401	1,2,3,4,5	SE CT
Yesler Terrace	First Hill	903 E Yesler Wy	607	0,1,2,3,4	

Fiirooyin ku saabsan tuseyaasha goobaha

- ¹ Tri-Court waa dhisme aan laga ogolayn sigaar-cabbista.
- ² Center Park waa guri galistiisu u fududahay dhamaan dadka naafo jidhka ah qaba.
- ³ Westwood Heights waa guri "waayeelka laga jecel yahay." Qof ka yar 62 sannadood halkan looma soo diro.
- ⁴ NewHolly waa beel dakhli ahaan isku-jir ah oo leh xoogaa guryo ah 'Low Income Public Housing'.
- * Guryahan ah SSHP waa laga ogol yahay xayawaanka guriga ee yaryar. Eyda lagama ogola guryaha SSHP.

Seattle Senior Housing Program

Waa inaad jirtid ugu yaraan 62 sannadood ama aad tahay qof weyn oo naafo leh (18+) si aad u codsatid guryaha SSHP. Guryaha qaarkood waxa loo ogol yahay xayawaanka qaarkood.

DHISME	XAAAFAD	ADREES	GURYO	QOLJIIF.	
Blakeley Manor	University District	2401 NE Blakeley	70	1,2	NORTHEAST
Olmsted Manor	Green Lake	501 NE Ravenna Blvd	35	1,2	
Pinehurst Court *	North City	12702 15th Ave NE	73	1,2	
Ravenna School Apts	University District	6545 Ravenna Ave NE	39	1,2	
Willis House	Green Lake	6341 5th Ave NE	42	1,2	
Bitter Lake Manor	Bitter Lake	620 N 130th St	72	1,2	NORTHWEST
Fort Lawton Place	Magnolia	3401 W Government Wy	24	1,2	
Fremont Place *	Fremont/Phinney	4601 Phinney Ave N	31	1,2	
Nelson Manor	Ballard	2200 NW 58th Ave	32	1,2	
Phinney Terrace	Phinney Ridge	6561 Phinney Ave N	51	1,2	
Pleasant Valley Plaza	Magnolia	3801 34th Ave W	41	1,2	SE
Schwabacher House	Ballard	1715 NW 59th St	44	1,2	
Sunrise Manor	Ballard	1530 NW 57th St	32	1,2	SW
Columbia Place *	Columbia City	4628 S Holly St	66	1,2	
Island View	West Seattle	3033 California Ave SW	48	1,2	SW
Wildwood Glen *	West Seattle	4502 SW Wildwood Pl	24	1,2	
South Park Manor	South Park	520 S Cloverdale St	27	1,2	CENTRAL
Carroll Terrace	Queen Anne	600 5th Ave W	26	1,2	
Gideon-Mathews	Central Area	323 25th Ave S	45	1,2	
Leschi House	International Dist	1011 S Weller St	34	1,2	
Michaelson Manor	Queen Anne	320 W Roy St #001	57	1,2	
Primeau Place	Capitol Hill	308 14th Ave E	53	1,2	
Reunion House	Capitol Hill	530 10th Ave E	28	1,2	

Guryaha Impact Property Management

Guryuhu way ku kala duwan yihiin xadka dakhliga. Hoos eeg.

GURIGA - XADKA DAKHLIGA	XAAAFAD	ADREES	GURYO	QOLJIIF.	
Bryant Apartments - 30%	University Dist	NE 55th St	4	3	NORTHEAST
Lake City Commons - 50%	Lake City	12745 30th Ave NE	15	2	
Ravenna Springs - 30%	University Dist	Ravenna Ave NE	4	3	
Stone Ave Townhomes - 50%	Green Lake	8514 Stone Ave	4	2	
Greenwood Apts - 50%	Bitter Lake	12701 Greenwood Ave	6	2	
Mary Ave Townhomes - 50%	Ballard	Mary Ave NW	2	3	NW
N 104th Townhomes - 50%	Greenwood	N. 104th St	3	2	
Longfellow Crk - 80%, 30%	West Seattle	5915 Delridge Way SW	84	1,2	SW
Lam Bow - 50%	West Seattle	6955 Delridge Way SW	51	1,2,3	
MLK Properties - 50%	Central Area	26th Ave S	6	3,4	CENTRAL
Fir St - 50%	Central Area	E Fir St, 19th Ave, 27th St	10	3,4	
Spruce St - 50%	Central Area	E Spruce St, 16th St	9	3,4	
Norman St - 50%	Central Area	S Norman St, S 29th Ave	15	3,4	
Bay View Tower - 30%	Downtown	2614 4th Ave	100	1,2	
Market House - 30%	Downtown	1531 1st Ave	51	1,2	

► **Ka waran haddii aan leeyahay baahi gaar ah?**

Fadlan noo sheeg haddii aad leedahay baahi gaar ah oo loo baahan yahay in lagu talogalo mudada lagu jiro habka codsiga ama marka aanu ku siino guri. Tusaalooyinka ku-sii-talogalka waxa ka mid ah qoraalo far waaweyn ku qoran, guryo lagu gali karo kursi-shaagle ama leh qalab gargaar oo kale, alaabta guriga qaarkood oo wax laga bedelo iyo guryo ku yaalla goobo gaar ah. Waxa aanu sameyn doonaa dadaal kasta si baahidaada wax looga qabto.

► **Xayawaanka guriga lagu haysto ma laga ogol yahay guryaha SHA?**

Xayawaanka guriga lagu haysto waa laga ogol yahay guryaha intooda badan. Eyda yaryar, bisadaha, shimbiraha iyo kaluunka waa laga ogol yahay guryaha 'Low Income Public Housing.' Bisadaha, shimbiraha iyo kaluunka waxa kaloo laga ogol yahay guryaha SSHP qaarkood. Waa aanu ka xunahay eyda lagama ogola guryaha SSHP. (Eeg tusaha goobaha SSHP ee ku yaalla bogga 7 si aad war dheeraad ah u heshid.) Guryaha IPM intooda badan waxa laga ogol yahay bisadaha, shimbiraha iyo kaluunka. Eyda yaryar waxa laga ogol yahay guryaha IPM qaarkood.

► **Sidee baan u soo gudbiya codsigayga hormariska ah?**

Waxa aad codsigaaga hormariska ah ku soo diri kartaa boosta ama gacanta ayaad PorchLight uga keeni kartaa. Fadlan la soco in aanaanu aqbalin codsiga hormariska ah ee faakis lagu soo diro. Marka aanu helno codsigaaga hormariska ah, waxa aanu magacaaga ku dari doonaa liisaska sugitaanka ee aad codsatay waxana aanu kuu soo diri doonaa warqad xaqiijin ah. Haddii aanad heli warqad xaqiijin ah lix todobaad gudahood ka dib markaa soo gudbisid codsigaaga hormariska ah, fadlan nala soo xidhiidh. Marka aad buuxinaysid codsigaaga hormariska ah, u hubso inaad buuxisid meel kasta oo la buuxinayo, adiga oo xuruuf kala go'an oo nidaam leh ku qoraya. Haddii codsigaaga hormariska ahi aanu dhameystirnayn, khaldan yahay ama aan la akhriyi karin, waxa suurogal ah in aanu kugu soo celino kaana codsano sixid ka hor intaan lagu darin liisaska sugitaanka.

► **Sidee baan u bedeli karaa adreeska iiga qoran SHA?**

Si aad u sameysid bedelid adrees qof ahaan, tag 'PorchLight Housing Center' ka dibna buuxi warqadda bedelidda adreeska. Si aad bedelid adrees u sameysid adiga oo isticmaalaya boosta ama faakis, soo qor warqad gaaban oo u ku jiro magacaaga, lambarkaaga Sugidda Bulshada (Sooshiyalka), adreeskaagii hore iyo adreeska cusub. Warqadda ku soo faakisgaree lambarkan 206-239-1770 ama boosta ugu soo dir adreeskan: Seattle Housing Authority, PorchLight Housing Center, 907 N.W. Ballard Way, Suite 200, Seattle, WA 98107-4637. Fadlan la soco in adreeskaaga oo aad ka bedeshid Boosta Maraykanka (United States Postal Service) aanay ahayn inaad bedeshay adreeskii aanuu kaa haynay. Waa inaad si gaar ah noogu soo sheegtid adreeskaaga cusub.

► **Dad ma ku dari kara amase ka saari karaa?**

Waa aad ku dari kartaa ama ka saari kartaa qof codsigaaga hormariska ah haddii aad isbedelka oo qoraal ah u soo gudbisid PorchLight. Fadlan ku soo dar magacaaga, lambarka Sugidda Bulshada (Sooshiyalka) iyo warka la bedelayo. Ku-daridda ama ka-saaridda dad waxay saameyn kartaa u-banaanaanta guryaha qaarkood. Haddii bedeliddu ay saameynayso u-banaanaantaada cabbir guri oo gaar ah (tirada qolalka jiiifka), waxa magacaaga lagu wareejin doonaa liiska sugitaanka ee tirada qolalkiisu sax kugu yahay. Fadlan la soco in la bedeli doono taariikhda codsigaaga taasoo loo bedeli doono taariikhda aad isbedelka na soo ogeysiisay, taasoo saameyn karta meeshii aad kaga jirtay liiska sugitaanka.

► **Sidee baan u joojin karaa codsigayga?**

Waxa aad joojin kartaa codsigaaga haddii qoraal u soo dirtid PorchLight. Marka aad joojinaysid codsigaaga, ku soo dar magacaaga, lambarka Sugidda Bulshada (Sooshiyalka), iyo magaca barnaamijyada aad codsatay.

► **SHA ma ii diidi kartaa gargaar?**

Haa. Xiitaa haddii aad cadeyn kartid inaad u baahan tahay hoy. Sharciga federalka ayaa SHA ku qasbaya in gargaar lagu diido haddii aan gargaarku kuu banaaneyn.

► **SHA miyay soo hubisaa warka qofka ee gaarka ah?**

Haa. Marka lagu jiro qaar ka mid ah heerarka kala duwan ee habka codsiga, SHA waxay hubin kartaa ama ay adiga kaa codsan kartaa inaad soo xaqiijisid ama keentid warkan soo socda: dhamaan illaha dakhliga, diiwaanada daymaha, taariikhda dambiga, taariikhda daganaanta guri iyo qoraal markhaati ah oo uu xirfadle bixinayo ama qof gaar ahi. SHA cid kale lama wadaagi doonto warkaaga gaarka ah.

► **Mudo intee leeg ayaa guri lagu helaa?**

Mudada sugitaanku waa mid aad u kala duwanaa karta oo ku xidhan hadba barnaamijyada guri ee la codsaday iyo xaaladaha suuqa. Xiitaa haddii aad haysatid horeynta koobaad, waxa dhici karta in sugitaanku ka bato hal sanno.

► **Kee baan ka doortaa liisaska sugitaanka?**

Si aad u codsatid guryaha 'Low Income Public Housing,' waa inaad dooratid liis sugitaan. Dooro liiska "Next Available Unit Waiting List" (Liiska Guriga ku Xiga ee Banaanaada) haddii aad raalli ka tahay in lagu siiyo guri kasta oo dawladdu leedahay oo ka banaan magaalada. Waa liiskaa ka caadi ahaan dadka kaligood ah iyo lamaanaha is qaba ugu sugitaanka yar. Waxa dhici karta inaan lagu siin guri leh cabbirkii aad filanaysay oo sax ah. Ha is qorin liiskaa haddii aad doonaysid inaad ku noolaatid goob gaar ah. Haddii aad doonaysid inaad ku noolaatid goob gaar ah, dooro liiska "Site Specific Waiting List" (Liiska Sugitaan ee Goob Gaar ah). Liiskani waxa uu kuu ogol yahay inaad dooratid hal ama laba guri oo ah guryaha 'Low Income Public Housing' oo magaalada ku yaala ka dibna waxa aad sugi kartaa in labadaa meelood mid uun guri ka banaanaado. Liiska 'Site Specific Waiting List' waxa uu yeelan karaa mudo sugitaan oo ka dheer ka hore.

► **Ma bedeli karaa liiska sugitaan ee aan doortay?**

Haa, waa aad bedeli kartaa liiska sugitaan ee aad ku jirtid. Haddii aad bedeshid, taariikhda codsigaaga waxa uu noqon doonaa maalinta aad bedelidda sameysay.

► **Sidee baan u codsan karaa guryaha ku yaalla NewHolly?**

NewHolly waxay leedahay guryo dhawr nooc ah oo leh shuruudo u-banaanaan iyo habab codsasho oo gaar ah. Codsadaha codsanaya guryaha ah 'Low Income Public Housing' (LIPH) ee ku yaalla NewHolly waa inuu soo galo dakhli ah boqolkiiba 30 dakhliga celceliska ah ee aagga ama wax ka yar. Waxa aad isticmaali kartaa warqadda 'Pre-application for housing assistance' si aad magacaaga ugu dartid liiska sugitaanka ee NewHolly LIPH. Wixii ah dhamaan guryaha kale, oo ay ku jiraan guryaha lagu kireeyo sicirka suuqa iyo guryaha leh "ka-dhimis cashuur," kala xidhiidh xaafiiska NewHolly intaad wacdid 206-760-3285 ama tag 7050 32nd Ave. S., Seattle, WA 98118. Xafiisku waxa uu furan yahay Isniin ka Jimce min 9 subaxnimo ilaa 6 galabnimo. Codsadeyaasha NewHolly waxa la marin doono hab shaandheyn oo lagu baadhayo qoys kasta taariikhdiisa daganaan guri, daymeed iyo dambi.

Maamulka Guryaha ee Degmada

Bellingham Housing Authority
208 Unity St. / P.O. Box 9701
Bellingham, WA 98227
360-676-6887

King County Housing Authority
600 Andover Park W.
Tukwila, WA 98188
206-574-1100

Snohomish Housing Authority
12625 Fourth Ave. W. #200
Everett, WA 98204
425-290-8499

Bremerton Housing Authority
110 Russell Rd. / P.O. Box 4460
Bremerton, WA 98312
360-479-3694

Kitsap County Housing Authority
9307 Bayshore Dr. N.W.
Silverdale, WA 98383
1-800-693-7070

Tacoma Housing Authority
902 S. "L" St.
Tacoma, WA 98405
253-207-4400

Everett Housing Authority
3107 Colby Ave. / P.O. Box 1547
Everett, WA 98206
425-258-9222

Pierce County Housing Authority
603 S. Polk St. / P.O. Box 45410
Tacoma, WA 98445
253-620-5400

Thurston County Housing Authority
503 W. Fourth Ave.
Olympia, WA 98501
360-753-8292

Island County Housing Authority
7 N.W. Sixth St.
Coupeville, WA 98239
360-678-4181

Renton Housing Authority
2900 N.E. Tenth
Renton, WA 98056
425-226-1850

Vancouver Housing Authority
2500 Main St.
Vancouver, WA 98660
360-694-2501

Bixiyeyaasha Guryo la Goyn Karo

Hay'adahaasi waxa ay guryo la qoyn karo oo joogto ah ka bixiyaan aagga Seattle. Hay'ad kastaa waxay leedahay shuruudo u-banaanaan oo u gaar ah. Fadlan wac ka hor intaanad u tagin si aad u ogaatid in guryahoodu kuu banaan yihiin iyo in kale.

St. Andrew's Housing (King County)
425-957-4742

Lutheran Alliance to Create Housing
206-789-3706

Capitol Hill Housing Improvement
206-329-7303

Plymouth Housing Group
206-652-8325

Archdiocesan Housing Authority
206-448-3360

Low Income Housing Institute
206-443-9935

Mt. Baker Housing Association
206-725-4152

Abaarmanada kiradooda ay kabto HUD

Abaarmanada ay leedahay 'Department of Housing and Urban Development' (HUD) (Wasaaradda Guryaha iyo Horumarinta Magaalooyinka) way ka duwan yihiin guryaha ay leeyihiin maamulka guryuhu. Si aad u heshid liiska abaarmanada ay kiradooda kabto HUD ee ku yaalla Seattle, King County, Pierce County iyo Snohomish County, wac 206-220-5140.

South East Effective Development
206-723-7333

Central Area Development Assoc.
206-328-2240

Housing Resources Group
206-622-2893

Hoyga Degdeg ah, hoyga ku-meel-gaadhsiis ah iyo gaboodka (shelter)

Ma u baahan tahay meel aad dhakhso u seexatid? Adiga ama qoyskaagu ma ku jiraa qalalaase? Ma u baahan tahay meel aad ku noolaatid inta aad sugaysid guri aad rasmi u dagtid? Haddii taasi jirto, waxa dhici karta inaad u baahan tahay hoy degdeg ah, hoy ku-meel-gaadhsiis ah ama gabood (shelter). Hay'adahan soo socda ayaa kaa gargaari kara sidii aad u heli lahayd adeegyadaa.

Senior Information and Assistance (Warka iyo Gargaarka Waayeelka)

206-448-3110 / 1-800-972-9990
Waxa ay hay'adaasi bixisaa war tiro badan oo loogu talagalay dadka cimrigoodu dhaafay 60 sannadood warkaasoo laga soo xigtay in ka badan 4,000 oo adeeg-bixiye. Shaqaalaha ha'yadda u shaqeeya ayaa ka fiirsan doona baahidaada kuna siin doona talo. Waxa kale oo ay hay'adani bixisaa la-talin iyo ka-sii-warhayn.

ku saabsan adeegyada beesha oo laga soo xigtay in ka badan 9,000 adeeg-bixiye. Shaqaalaha hay'adda ayaa ka fiirsan doona baahidaada kuna siin doona talo ku saabsan hay'adaha ku gargaari kara.

24 Hour Crisis Line (Khadka Qalalaasaha ee 24-ka Saacood Shaqeeya)

206-461-3222 / 1-800-244-5767
Waxay dadka ku jira qalalaase niyadda ah siisaa gargaar degdeg ah. Shaqaalaha ka shaqeeya waxa kale oo ay gargaar kaa siin karaan tabaha ka-kaabashada dhibaatooyinka niyadda iyo u-gudbinta hay'adaha bixiya gargaar dheeraad ah.

Si aad u heshid liis tifaftiran oo ah 'shelters and drop-in centers' (gaboodyada iyo xarumaha la iska tago), akhri qoraalka yar ee la yidhaahdo 'Shelters/Drop-in Centers' ee ay soo saartay 'PorchLight Housing Center.'

Community Information Line (Khadka Warka Beesha)

206-461-3200 / 1-800-621-4636
Waxa ay hay'adaasi bixisaa war tiro badan oo